

# Minnesota Student Survey – Level 2 (Ra’yi Aruurinta Ardayda Minnesota - Heerka 2)

***Kobbigaan waxaa loogu talagalay tixraac oo kaliya. Ardaydu waxay ka buuxin doonaan sahanka runta ah internetka.***

Waxaad ka caawin kartaa bulshadaada iyo iskuulka inay wax badan ka bartaan nolosha iyo dareenka dhalinyarada adiga oo kale ah. Su'aalaha ra'yi aruurintan waxay ku saabsanyihiin dhinacyo badan. Su'aalaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaad yara dhibsato. Uma baahnid inaad ka jawaabto su'aal kasta oo aadan rabin. Waxaad dooran kartaa inaad dhammeystirin ra'yi aruurintaan.

Qofna ma ogaan doono sida aad uga jawaabtay su'aalahaan. Jawaabahaaga meel qarsoon ayaa lagu hayn doonaa. Waad ku mahadsantahay inaad u buuxiso si daacad ah oo taxadar leh.

## **1. Fasalkee ayaad ku jirtaa/ dhigataa iskuulka hadda?**

- a. Fasalka 7aad
- b. Fasalka 8aad

## **2. Imisa jir ayaad tahay?**

- a. 11 sano ama ka yar
- b. 12 sano jir
- c. 13 sano jir
- d. 14 sano jir
- e. 15 sano jir
- f. 16 sano jir
- g. 17 sano jir
- h. 18 sano jir
- i. 19-20 sano jir
- j. 21 sano jir ama ka weyn

## **3. Maxaad ku tilmaami kartaa naftaada? (Haddii hal mid wax ka badan ay kugu saabsanyihiin, calaamadee DHAMMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
- b. Aasiyaan ama Aasiyaanka Mareykanka ah
- c. Madaw, Afrikaan ama Afrikaanka Mareykanka ah
- d. Isbaanish ama Latino/Latina
- e. Dhaladka Hawaii ama Jasiiradaha kale ee Baasifiga
- f. Caddaan

**\* Haddii aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska, kooxdee sida ugu fiican kuu tilmaameysa? (Haddii hal mid wax ka badan ay kugu saabsanyihiin, calaamadee DHAMMAAN kuwa khuseeya)**

- a. Anishinaabe/Ojibwe
- b. Dakota/Lakota
- c. Qabiil kale oo la xiriira

**\* Haddii aad tahay Aasiyaan ama Aasiyaan Ameerikaanka, kooxdee sida ugu fiican kuu tilmaameysa? (Haddii hal mid wax ka badan ay kugu saabsanyihiin, calaamadee DHAMMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Hindida Aasiya
- b. Burmese/Barmiis
- c. Chinese/Shiineys
- d. Filipino/Filibiino
- e. Hmong/Moong
- f. Karen/Kaaren
- g. Korean/Kuuriyaan
- h. Lao/Laawo
- i. Vietnamese/Fiidnaamiis
- j. Aasiyaan kale

**\* Haddii aad tahay Madow, Afrikaan ama Afrikaan Ameerikaan, kooxdee sida ugu fiican kuu tilmaameysa? (Haddii hal mid wax ka badan ay kugu saabsanyihiin, calaamadee DHAMMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Afrikaan-Ameerikaan
- b. Itoobiyaan - Oromo
- c. Itoobiyaan - kale
- d. Liberian/Laybeeriyaan
- e. Nigerian/Nayjeeriyaan
- f. Soomaali
- g. Cid kale oo Madow, Afrikaan ama Maraykanka Madow

**\* Haddii aad tahay Hispanic ama Latino/Latina, kooxdee sida ugu fiican kuu tilmaameysa? (Haddii hal mid wax ka badan ay kugu saabsanyihiin, calaamadee DHAMMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Colombian/Kolombiyaan
- b. Ecuadoran/Ikwadooraan
- c. Guatemala/Guwaatameela
- d. Maksikaan
- e. Puerto Rican/Boortarikaan
- f. Salvadoran/Salfadooraan
- g. Isbaanish/Isbaanish-Ameerikaan
- h. Hispanic ama Latino/Latina kale

**4. Waa kee jinsiga aad ku dhalatay?**

- a. Lab
- b. Dhedig

**5. Miyaad tahay qof jinsiga bedeshay (transgender), genderqueer (aan isu maleyn jinsiga uu u muuqdo), ama genderfluid (bedbedela jinsiga uu sheegto)?**

- a. Haa
- b. Maya
- c. Ma hubo waxa uu yahay aqoonsiga jinsigayga
- d. Ma hubo waxa su'aashan macnaheedu yahay

**\*Sidee ayaad u tilmaantaa/qeexdaa naftaada?**

- a. Nin, rag isubedelay, lab isu bedelay ama dumar rag isubedelay
- b. Dumar, gabar isubedelay, dhedig isu bedelay, ama rag dumar isubedelay
- c. Non-binary (labada jinsi), genderqueer (aan isu maleyn jinsiga uu u muuqdo, ama genderfluid bedbedela jisiga uu sheegto)
- d. Waxaan doorbidaa inaan ku tilmaamo jinsigayga inuu yahay wax kale

**6. Waxaa maxay waxa ugu MUHIIMSAN ee aad qorshaynayso inaad qabato MARKA AAD SAAS U DHAMAYSO dugsiga sare?**

- a. Ma qorshaynayo inaan ka qalinjabiyo dugsiga sare
- b. Inaan helo GED-ga
- c. In aan aado kulleejka bulshada oo (community college) laba sano ah ama mid farsamo
- d. In aan aado kulleejka afar sano ah ama jaamacad
- e. In aan qaato shati ama shahaadada/sartifikeet shaqo xirfadeed
- f. In aan ka qaybgalo barnaamijka tababar
- g. In aan ku biiro ciidamada/milatariga
- h. In aan ka shaqeeyo shaqo
- i. Wax Kale

**7. Ma qaadataa adeegyada waxbarashada gaarka ah oo qayb ka ah qorshaha waxbarashada shakhsi ahaaneed ama IEP?**

- a. Haa
- b. Maya
- c. Ma hubo

**8. Miyaad iminka iskuulka ka qaadataa qado bilaash ah ama qiimaha laga dhimay?**

- a. Haa
- b. Maya
- c. Ma hubo

**9. Sideed ku tilmaami lahayd buundooyinka fasaladaada sanad dugsiyeedkan?**

- a. Inta badan A
- b. Inta badan B
- c. Inta badan C
- d. Inta badan D
- e. Inta badan F
- f. Inta badan Incomplete/aan dhamaystirnayn
- g. Midkoodna maaha buundooyinkan xarfaha ah

**10. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayaad ka maqnayd...**

	Marna ba	Mar ama laba jeer	3 ilaa 5 jeer	6 ilaa 9 jeer	10 jeer ama ka badan
Maalin iskuul oo buuxda? (Ha ku darin howlaha iskuulku maalgaliyo sida safarada dibadda, cayaaraha, munaasabadaha akadeemiyada ama muusikada.)					
Qayb ka mid ah maalinta iskuulka sida soo daahitaanka, adigoo goor hore fasalka ka tegey ama adigoo fasal ka maqnaa maalinta dhexdeeda?(Ha ku darin howlaha iskuulku maalgaliyo sida safarada dibadda, cayaaraha, munaasabadaha akadeemiyada ama muusikada.)					

**\* Waa maxay sababaha aad iskuulka uga maqnayd maalin dhan ama qayb ka mid ah maalinta iskuulka 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- Xanuun aad dareemaysay (xanuunka jirka), oo ay ku jiraan dhibaatooyinka neefsashada ama ilkaha
- Caafimaad, dhakhtarka ilkaha ama ballan kale oo caafimaad
- Faakeeshin ama safar
- Murugo aad dareemaysay, rajo-xumo, welwel, walaac ama caro
- In aadan helin hurdo kugu filan
- In aadan iskuulka nabadgelyo ku dareemayn
- In aad seegtay gaadiidkaaga ama aadan helin hab aad iskuulka ku addo
- In aad shaqeynaysay
- In aad daryeelaystay xubin qoyska ah ama saaxiib
- In aadan haysan meel aad ku qubaysato ama dharka ku dhaqato
- In aad rabtay in aad isticmaasho khamro ama daroogo
- In aad hoos uga dhacday shaqada iskuulka ama aadan u diyaar garoobin imtixaan ama shaqada fasalka
- In aad ku caajistay ama aadan xiisaynayn iskuulka
- In lagaa joojiyey iskuulka (suspension)
- Sabab kale

**11. Intii lagu jiray 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayaa lagaaga saaray fasalka si edbin ah?**

- Marna
- Mar ama laba jeer
- 3 ilaa 5 jeer
- 6 ilaa 9 jeer
- 10 jeer ama ka badan

**12. Intee in le'eg ayaad...**

	Mar kasta	Inta badan waqtiga	Waqtiga qaar	Marnaba Waqtiga
Danaynaysaa in aad wax fiican ka keento iskuulka?				
Ayaad u feejignaataa fasalka?				
Ayaad fasalka tagtaa adiga oo aan diyaar u ahayn?				

**13. Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama diiddan tahay mid kasta oo ka mid ah hadallada/weedhaha soo socda?**

	Si adag u raacsan	Ku raacsan	Diiddan	Aad u diiddan
Haddii wax i xiisogeliyaan, waxaan isku dayaa inaan wax badan ka ogaado.				
Waxaan u malaynayaa in waxyaabaha aan ka barto iskuulku ay yihiin kuwo faa'iido leh.				
Arday ahaanshuhu waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aan ahay.				
Guud ahaan, dadka qaangaarka ah ee iskuulkaygu waxay ula dhaqmaan ardayda si caddaalad ah.				
Dadka qaangaarka ah ee iskuulkaygu way dhegeystaan/maqlaan ardayda.				
Xeerarka iskuulku waa kuwo caddaalad ah.				
Iskuulkayga, macallimiintu waxay danaynayaan ardayda.				
Macallimiinta iskuulkayga badankood ayaa i danaynaya aniga shakhsi ahaan.				

**14. Intee in le'eg ayaad ku raacsan tahay ama diiddan tahay mid kasta oo ka mid ah hadallada/weedhaha soo socda?**

	Si adag u raacsan	Ku raacsan	Diiddan	Aad u diiddan
Waxaan dareemayaa nabadgelyo marka aan u socdo iskuulka iyo marka aan kasoo socdo.				
Waxaan dareemayaa nabadgelyo marka iskuulka joogo.				
Waxaan dareemayaa nabadgelyo marka xaafaddayda joogo.				
Waxaan dareemayaa nabadgelyo marka guriga joogo.				

**15. Iskuulkaaga miyuu joogaa sarkaal booliis ah ama Sarkaal Qaabilsan Iskuulka (SRO)?**

- a. Haa
- b. Maya
- c. Ma aqaano

**\* Haddii aan ogaan lahaa wax halis ah ama sharci darro ka ah iskuulkayga, waxaan u sheegi lahaa SRO ama sarkaal booliiska ah.**

- a. Si adag u raacsan
- b. Ku raacsan
- c. Diiddan
- d. Aad u diiddan

**\* Waxaan dareemi lahaa nafis/raaxo (comfortable) inaan u tago sarkaalka booliiska ama SRO ee iskuulka haddii aan wax dhibaato ah qabo ama aan u baahdo caawimo.**

- a. Si adag u raacsan
- b. Ku raacsan
- c. Diiddan
- d. Aad u diiddan

**\* Waxaan u malaynayaa inay tahay fikrad wanaagsan in uu joogo SRO ama sarkaal booliis ah iskuulkeena.**

- a. Si adag u raacsan
- b. Ku raacsan
- c. Diiddan
- d. Aad u diiddan

**16. Intii lagu jiray 30-kii maalmood ee ugu dambeeyay, imisa jeer ayey ardayda kale ku dhibaateeyeen sababaha soo socda dartood?**

	Marnaba	Mar ama laba jeer	Qiyaas ahaan hal mar asbuucii	Dhowr jeer asbuucii	Maalin walba
Jinsiyadaada, qowmiyadaada ama asalka wadankaaga					
Diintaada					
Jinsigaaga (lab ama dhedig)					
Naafonimada jirka ama maskaxda					
Cabbirkaaga ama miisaankaaga					
Muuqaalkaaga jir ahaan					

**17. Intii lagu jiray 30-kii maalmood ee ugu dambeeyay, imisa jeer ayaa dhanka internetka lagaa dhibaateeyey (cyberbullied)? (Tiri haddii lagugu dhibaateeyey fariimaha qoraalka, Instagram, Snapchat ama warbaahinta kale ee bulshada)**

- a. Marnaba
- b. Mar ama laba jeer
- c. Qiyaastii hal mar toddobaadkii
- d. Dhowr jeer toddobaadkii
- e. Maalin walba

**18. Intii lagu jiray 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayey ardayda kale ee iskuulka dhigataa...**

	Marnaba	Mar ama laba jeer	Qiyaastii hal mar toddobaadkii	Dhowr jeer toddobaadkii	Maalin walba
Ay ku riixeen, lagu kala tuuray, lagu dhirbaaxay ama lagu haraatiyey, iyaga oon ciyaaraynin?					
Kuugu hanjabeen in ay ku garaaci doonaan?					
Kaa faafiyeen warar aan jirin ama been ah oo kugu saabsan?					
Ay adiga kaa sameeyeen dacaayad, haddallo ama tilmaamo ku saabsan galmo?					
Ay kaa saareen asxaabta, ardayda kale ama howlaha kale?					

**19. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee ugu dambeeyey, imisa jeer AYAAD adiga oo iskuulka jooga...**

	Marnaba	Mar ama laba jeer	Qiyaastii hal mar toddobaadkii	Dhowr jeer toddobaadkii	Maalin walba
Aad riixday, kala tuurtay, dhirbaaxday ama haraatiday, adiga oo aan ciyaaraynin?					
Ugu hanjabtay inaad garaaci doonto qof kale?					
Aad ka faafisay warar aan jirin ama been ah oo ku saabsan qofkale?					
Aad adigu qof kale ka samaysay dacaayad, haddallo ama tilmaamo ku saabsan galmo?					
Aad qof ka saartay asxaabta, ardayda kale ama hawlaha kale?					

**20. Inta lagu jiro asbuuca caadiga ah, imisa jeer ayaad tagtaa meelaha soo socda iskuulka ka dib?**

	0 maalmood	1 maalin	2 maalmood	3 ilaa 4 maalmood	5 maalmood
Iskuulkayga ayaan joogaa ama waxaan tagaa iskuul kale					
Gurigeysa ama guri kale sida guriga saaxiib, qaraabada ama jaarka					
Meel Jardiino/Xadiiqad ah, xarunta bulshada ama meel kale oo xarun dhalinyaro ah.					
Goob Jardiino/Xadiiqad ah ama meel kale oo dibadda ah					
Maktabada/Laybareeriga					
Kaniisad, sinagooga, masaajid, ama meel kale oo ruuxi/diini ah					

**21. Iskuulkaaga ama bulshadaadu miyay bixiyaan barnaamijyo kala duwan oo loogu talagalay dadka da'daada oo kale jira inay ka qayb galaan xilli ka baxsan xiliga iskuulka caadiga ah?**

- Haa
- Maya
- Ma aqaan barnaamijyada laga heli karo bulshadeyda



**22. Inta lagu jiro asbuuca caadiga ah, imisa jeer ayaad ka qayb-qaadataa hawlaha soo socda xilli ka baxsan wakhtiga iskuulka caadiga ah?**

	0 maalmood	Maalin	2 maalmood	3 ilaa 4 maalmood	5 maalmood ama ka badan
Kooxaha isboortiga, sida kooxaha jardiino/xadiiqad & rec, kooxo iskuulka, kooxaha xaafada ama kooxaha socdaalka					
Howlaha iskuulku uu maalgaliyo ama naadiyada aan ciyaarin isboortiga, sida riwaayadaha, muusikada, chess ama naadiga sayniska					
Kaalmayn/waxbarasho, caawimaad shaqo-guri ama barnaamijyada tacliinta					
Hawlaha hogaaminta sida maamulka ardayda, golayaasha dhalinyarada ama guddiyada					
Casharada farshaxanka, sida muusikada ama qoob-ka-ciyaarka					
Casharada howlaha jimicsiga, sida teniska ama kaaratee					
Naadiyada kale ee bulshada iyo barnaamijyada sida 4-H, Scouts, Y-clubs ama Community Ed(tacliinta bulshada)					
Howlaha diinta sida adeegyada diinta, barashada ama barnaamijka dhalinyarada					

**23. Markaad wakhti ku qaadato waxqabadyo ka baxsan maalinta iskuulka ee caadiga ah, intee in le'eg ayaad...**

	Marar dhif ah ama marnaba	Mararka qaar	Inta badan	Inta badan
Ayaad dareentaa ammaan?				
Ayaad barataa xirfadaha sida koox-la-shaqaynta ama hogaamin?				
Ayaad barataa samaysashada xiriir dhisaya kalsoonida aad ku qabto dadka aad isku da'da tihiin?				
Ayaad barataa samaysashada xiriir dhisaya kalsoonida aad ku qabto dadka qaan gaarka ah?				
Ayaad caawisaa sidii go'aan loo qaadan lahaa?				
Ayaad samaysaa wax ku siiya farxad iyo tamar/enerji?				
Ayaad barataa xirfadaha aad u isticmaali karto shaqo mustaqbalka ah?				

**24. Sideed ku tilmaami lahayd caafimaadkaaga guud ahaan?**

- Aad iyo aad u fiican
- Aad u fiican
- Fiican
- Dhex-dhexaad
- Xun

**25. Miyay kugu dhacday xanuunkan ilkaha ee soo socda 12kii bilood ee ina dhaafay? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- Ilkaha oo ku xanuunaya
- Ilkaha oo qurma ama suus galo
- Cirridka oo ku bararay, ku xanuuna ama ku dhiigaya
- In aad cuni kari wayday cuntada qaarkeed sababta oo ah dhibaataada ilkaha
- Hal maalin ama ka badan aad iskuulka uga maqnayd sababtoo ah dhibaataada ilkaha
- Mayna igu dhicin midna dhibaatooyinkan ilkuhu

**\* Miyaad u tagtay dhakhtarka ilkaha si uu wax uga qabto dhibaataadan ilkaha?**

- Haa
- Maya, laakiin waan u tegi doonaa dhakhtarka ilkaha
- Maya, ma awoodo in aan helo daaweynta ilkaha

**26. Goorma ayay ahayd markii ugu dambaysay ee aad dhakhtarka ilkaha u aragtay baaritaan, baaris ama nadiifin ilko ama shaqo ilko oo kale?**

- Sanadkii hore
- Inta u dhaxaysa 1 iyo 2 sano ka hor
- In ka badan 2 sano ka hor
- Marnaba

- 27. Waa imisa dhererkaagu? (Qor lamabarka buuxa; ha raacinin decimal ama qaybin)**
- Feet/fiit:
  - Inches/inji:
- 28. Waa imisa miisaankaagu? (Qor lamabarka buuxa; ha raacinin decimal ama qaybin)**
- Pounds/boond:
- 29. Miyaad leedahay naafonimo jirka ah, ama dhibaatooyin caafimaad oo muddo dheer ah (sida neefta, kansarka, sonkorowga/macaanka, suuxdinta ama wax kale)? Waqtiga muddo dheer waxaa loola jeedaa 6 bilood ama ka badan.**
- Haa
  - Maya
- 30. Miyaad qabtaa xanuun dhanka maskaxda ah, dhanka hab-dhaqanka ama dhanka dareenka/shucuurta ah oo muddo dheer ku hayay? Waqtiga muddo dheer waxaa loola jeedaa 6 bilood ama ka badan.**
- Haa
  - Maya
- 31. Weligaa miyaa lagaa daaweeyey xanuunka maskaxda, dhanka dareenka/shucuurta ama dhanka hab-dhaqanka? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**
- Maya
  - Haa, sanadkii hore
  - Haa, in ka badan hal sano ka hor
- 32. Weligaa miyaa lagaa daaweeyey dhibaatada khamriga ama daroogada? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**
- Maya
  - Haa, sanadkii hor
  - Haa, in ka badan hal sano ka hor
- 33. Intii lagu jiray 7da cisho ee ugu dambaysay, imisa maalmood ayaad jir ahaan jimicsi samaysay ugu yaraan 60 DAQIIQO MAALINTII? (Isku wada dar dhammaan wakhtiyada aad ku bixisay jimicsi kordhiyay xaddiga garaaca wadnahaaga oo kugu adkeeyey neefsashada)**
- 0 maalmood
  - 1 maalin
  - 2 maalmood
  - 3 maalmood
  - 4 maalmood
  - 5 maalmood
  - 6 maalmood
  - 7 maalmood
- 34. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee ugu dambeeyey, miyaad ku qasbanayd inaad ka boodo xilligii cuntada sababtoo ah qoyskaagu ma haysan lacag idinku filan oo aad cunto ku iibsataan?**
- Haa
  - Maya

**35. Inta lagu jiro asbuuca iskuulka ee caadiga ah, xaggee baad ka heshaa qadada? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Sida caadiga ah ma cuno qado
- b. Qadada iskuulka ee caadiga ah ee aan ka helo kafateeriyada
- c. Laynka a la carte (libsiga waxyaabo aan rabo)
- d. Dukaanka iskuulka ama mashiinka cuntada(vending machine)
- e. Makhaayadda cuntada degdega ah, baatroot isteeshin ama meel kale oo ka baxsan iskuulka
- f. Waxaan guriga ka soo qaataa qado

**36. Inta lagu jiray 7dii cisho ee ugu dambeysay, imisa jeer ayaad...**

	Tan MA cunin ama ma cabin	1 illaa 3 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	4 ilaa 6 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	1 jeer maalintii	2 jeer maalintii	3 jeer maalintii	4 jeer ama wax ka badan maalintii
Aad cabtay cabitaanada <b>100% miro ah (100% juice)</b> sida liinta, tufaaxa ama canabka? ( <b>Ha</b> ku darin tirade punch, Kool-Aid, cabitaanada isboortiga ama cabitaan kale oo dhadhanka khudaarta leh)							
Aad cuntay <b>miro/fruits ? (Ha</b> ku tirin casiirka furuutada)							
Ayaad cuntay <b>saladh cagaaran, baradho, kaarootada</b> ama <b>khudaarta kale?</b> (Ha ku <b>darin</b> French fries (jibiska), baradhada la shiilay, ama baradhada jibiska)							
Ayaad cunto ka cuntay <b>makhaayadaha degdega ah,</b> oo ay ku jiraan soo qaadashada ama in guriga laguugu keeno?							

**37. 7-dii maalmood ee ugu dambeeyay, imisa jeer ayaad cabtay...**

	Tan MA cunin ama ma cabin	1 illaa 3 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	4 ilaa 6 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	1 jeer maali ntii	2 jeer maalintii	3 jeer maalintii	4 jeer ama wax ka badan maalintii
Hal koob/galaas oo <b>caano ah?</b> (Tiri caanaha aad ku cabtay koob, kaartoon, ama siriyaal ku darsatay.)							
Daasad ama dhalo soodha ama <b>pop ah</b> , sida Coke, Pepsi ama Sprite? ( <b>Ha</b> ku tirin diet pop ama diet soda)							
Daasad ama dhalo <b>cabitaan isboorti ah</b> , sida Gatorade ama Powerade? (Ha ku <b>darin</b> cabitaanada isboortiga ee low-calorie ah sida Propel ama G2)							
Daasad ama galaas <b>energy drink (cabitaan tamareed)</b> , sida Rockstar, Red Bull, Monster ama Full Throttle?							

	Tan MA cunin ama ma cabin	1 illaa 3 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	4 ilaa 6 jeer 7dii maalmood ee ugu dambeeyay	1 jeer maali ntii	2 jeer maalintii	3 jeer maalintii	4 jeer ama wax ka badan maalintii
Daasad ama galaas <b>kafee</b> ama <b>shaah ah</b> oo sonkor, sokorta dareeraha ah (syrup), ama malab lagu daray? (Tiri kafee iyo shaaha aad ku dartay macaaneeye (sweetener) ama horeba usii lahaa macaan, sida Arizona Iced Tea ama Frappuccinos. <b>Ha</b> tirin macaaneeyeyaasha macmalka ah sida Splenda, ama cabitaanka diet-ka ah.)							
Daasad ama galaas <b>cabitaan miro leh oo macaan</b> , sida Kool-Aid, Capri Sun ama biyo liin (lemonade)? (Ha ku <b>darin kuwa ah</b> 100% miro khudradda ah, sida 100% cabitaanka liimada ee saafiga/seeko ah.)							
Caagad ama galaas <b>biyo ah?</b>							

### 38. Dhakhtarka ama kalkaaliyaha ma kuu sheegay in aad qabto...

	Haa	Maya
Sonkorowga/macaan?		
Diabeteska ka hor/macaanka ka hor (Pre-diabetes)?		
Neefta/Asmo?		
Alarji/Xasaasiyadda aad u baahan tahay inaad qaadato epi-pen?		

**39. Intee jeer ayaad xirataa suunka kursiga markaad la socoto gaariga, taraag ama SUV?**

- a. Marnaba
- b. Marar dhif ah
- c. Mararka qaar
- d. Inta badan waqtiga
- e. Mar walba
- f. Anigu marnaba ma raaco baabuur, taraag ama SUV

**40. Inta lagu jiro habeenada iskuulku jiro ee caadiga ah, imisa saacadood oo hurdo ah ayaad heshaa?**

- a. 4 saacadood ama ka yar
- b. 5 saacadood
- c. 6 saacadood
- d. 7 saacadood
- e. 8 saacadood
- f. 9 saacadood
- g. 10 saacadood ama ka badan

**41. Intii lagu jiray 12kii bilood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayaad isticmaashay qalab jirka lagu madoobeeyo sida sunlamp, sunbed ama tanning booth?**

- a. 0 jeer
- b. 1 ama 2 jeer
- c. 3 ilaa 9 jeer
- d. 10 ilaa 19 jeer
- e. 20 ilaa 39 jeer
- f. 40 ama ka badan

**42. Intee in le'eg ayaad darentaa...**

	Marnaba	Wax yar	Xoogaa	In yara badan	Wax aad u badan
In waalidkaagu ay ku xanaaneeyaan adiga?					
In qaraabada kale ee qaangaarka ah ay ku xanaaneeyaan?					
Saaxiibadaadu ay ku danaynayaan?					
Macalimiinta/dadka qaangaarka ah ee iskuulka jooga ay ku danaynayaan?					
In dadka qaangaarka ah ee ka tirsan bulshadaadu ayaa ku daryeelayaan adiga?					

**43. Dadkan qaangaarka ah kuwee ayaad kala hadli kartaa wixii dhibaatooyin ah ee ku qabsada? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Waalidka ama Mas'uul
- b. Dadka qaangaarka ah ee iskuulka
- c. Qof kale oo qaangaar ah
- d. Ma haysto qof weyn oo aan kala hadli karo dhibaatooyinka aan haysto



**44. Guud ahaan, sidee mid kastoo ka mid ah hadaladan/weedhahan soo socda ay kuu tilmaamayaa?**

	Marnaba ama marmar dhif ah	Wax yar ama mararka qaarkood	Aad ama badanaa	Aad iyo aad ama markasta
Waxaan dareemayaa in aan anigu maamulo noloshayda iyo mustaqbalkaba				
Wanaag baan ka dareemayaa naftayda.				
Waxaan iraaqdaa maya wixii halis ama caafimaad darro ah.				
Waxaan la samaystaa saaxiibtinimo dadka kale.				
Si haboon ayaan u caddeeyaa sida aan dareemayo.				
Wanaag baan ka dareemayaa mustaqbalkeyga.				
Waan la tacaalaa wixii niyad jab ah inta aysan noqonin wax aad ii niyad jebinaya.				
Waxaan helaa habab wanaagsan oo wax looga qaban karo waxyaabaha igu adag ee noloshayda.				
Horay baan wax u sii qorsheeyaa oo waxaan sameeyaa doorasho wanaagsan.				
Waxaan ka fogaadaa duufsashada xun.				
Waan xalliyaa khilaafaadka iyada oo aan cidna waxyeello soo gaadhin.				
Waxaan dareemayaa qiimo iyo qadarin ay ii hayaan dadka kale.				
Waan aqbalaa dadka kale ee aniga iga duwan.				
Waxaan isweydiinayaa waxay ay ujeedada noloshaydu tahay.				
Waa la igu daraa hawlaha iyo go'aamada qoyska.				
Waxaa la i siiyaa door iyo kaalin aan qaato oo muhiim ah.				
Waxaan dareemaa baahida iyo dareenka ay dadka kale qabaan.				

**45. 2-dii toddobaad ee ugu dambeeyay, imisa jeer ayaad isku aragtay:**

	Maya ma jirto	Maalmo dhawr ah	In ka badan maalmaha nuskood	Ku dhowaad maalin kasta
Xiisaha ama ku raaxaysiga aad u hayso wax qabashada oo yaraaday?				
In aad dareemaysay niyad jab, iskubuuq ama rajo la'aan?				
In aad dareemaysay welwel, walaac ama si fudud inaad u carooto?				
In aadan awoodin inaad joojiso ama xakamayso welwelka?				

**46. 12kii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayaad wax u samaysay si aad ula kac u dhaawacdo ama wax u gaarsiiso naftaada adiga oo aan dooneynin inaad dhimato, sida isjarida, isgubida, ama aad ula kac wax isugu dhufatay?**

- 0 jeer
- 1 ama 2 jeer
- 3 ilaa 5 jeer
- 6 ilaa 9 jeer
- 10 ilaa 19 jeer
- 20 ama ka badan

**47. Weligaa si dhab ah ma isugu dayday inaad isdicho? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- Maya
- Haa, sanadkii hore
- Haa, in ka badan hal sano ka hor

**48. Weligaa ma ku dhaqaaqday inaad isdicho? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- Maya
- Haa, sanadkii hore
- Haa, in ka badan hal sano ka hor

**49. Miyaad yeelatay xiriir caadi ah ama mid dhab ah oo lamaanahaagu waligii uu:**

	Haa	Maya
Jir ahaan wax ku yeelay si ula kac ah (ku riixay, ku haraatiyey, ku dhirbaaxay, feer kugu dhufatay, ku ceejiyey, uu dhaawac ku gaarsiiyay isaga oo isticmaalaya walax/shay ama hub, iwm)?		
Af ahaan wax ku yeelay ama ku xakameeyey (oo kuugu yeeray magacyo, kuu sheegay waxa aad cuni kartid, kuu sheegay cidda aad arki kartid ama la hadli kartid, kuu hanjabay, hab-dhaqankiisa adiga kugu eedeeyey, iwm)?		

**50. Weligaa ma ku jirtay foster care (daryeelka korinta)? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Maya
- b. Haa, sanadkii hore
- c. Haa, in ka badan hal sano ka hor

**51. 12kii bilood ee la soo dhaafay, miyaad ku jirtay shaltar, meel aan loogu talagelin inay noqoto meel lagu noolaado, ama guriga qof kale sababtoo ah maadan haysan meel kale oo aad joogtid? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Maya
- b. Haa, waxaan la joogay waalidkay ama xubin qoyska ah oo qaangaar ah
- c. Haa, aniga ayaa keligay ahaa aniga oo aan haysan qof qaangaar ah oo qoyskeyga ah

**52. Miyuu mid ka mid ah waalidiintaada ama mas'uulkaagu weligood ku jiray/galay jeel ama xabsi? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Midkoodna waalidiintayda ama mas'uulkayga weligiis jeel ama xabsi muuna ku jirin.
- b. Haa, waxaan haystaa waalid ama mas'uul jeel ama xabsi hadda ku jira
- c. Haa, waxaa hadda ka hor jeel ama xabsi ku jiray waalidkay ama mas'uulkayga

**\* Miyaad la noolayd waalidka ama mas'uulka markii jeelka ama xabsiga lageeyey?**

- a. Haa
- b. Maya

**53. Miyaad la nooshahay qof khamri aad u badan cabba?**

- a. Haa
- b. Maya

**54. Miyaad la nooshahay qof isticmaala daroogo sharci darro ah ama si khaldan u isticmaala daawooyinka dhakhtarku qoro?**

- a. Haa
- b. Maya

**55. Miyuu waalidkaa ama qof kale oo weyn oo gurigaaga jooga si joogto ah kuugu dhaartaa adiga, miyuu ku caayaa ama miyuu ku liidaa/hoos kuu dhigaa?**

- a. Haa
- b. Maya

**56. Miyuu waalid ama qof kale oo qaangaar ah oo gurigaaga jooga uu waligii wax kugu dhuftey, ku garaacay, ku haraatiyey ama jir ahaan si uun kuu waxyeeleeyey?**

- a. Haa
- b. Maya

**57. Miyaad la nooshahay qof niyadjab qaba (depression) ama qaba waxyaabaha kale ee caafimaadka maskaxda?**

- a. Haa
- b. Maya

**58. Miyay waalidkaa ama qaangaarka kale ee gurigiina ku nool ay isdhirbaaxeen, wax isku dhufteen, is-haraatiyeen, feer isku dhufteen ama ay si kale isu dileen?**

- a. Haa
- b. Maya

**59. Miyuu weligaa qof AAN qoyskaaga/qaraabadaada ahayn kugu riixay/cadaadiyay, kugu siray, ama kugu qasbay in aad samaysid wax galmo ah ama uu kugu sameeyey wax galmo ku saabsan adiga oo aan rabin?**

- a. Haa
- b. Maya

**60. Miyuu weligaa qof qoyskaaga/qaraabadaada ah kugu riixay/cadaadiyay, kugu siray, ama kugu qasbay in aad samaysid wax galmo ah ama uu kugu sameeyey wax galmo ku saabsan?**

- a. Haa
- b. Maya

**61. 12kii bilood ee ugu dambeeyey, intee jeer ayaad samaysay waxyaabahan khamaarka/sharadka ku saabsan:**

	Maya ma jirto	In ka yar hal mar bishii	Qiyaastii hal mar bishii	Qiyaastii hal mar toddobaad kii	2 ilaa 6 jeer toddobaad kii	Maalin walba
Ciyaartay turub, aad sharad (bet) ku gashay kooxaha isboortiga, ciyaaraha xirfada shakhsiyeed sida ciyaaraha fiidiyowga, pool, golf ama bowling?						
libsatay tigidhada bakhtiyaa-nasiibka ama kaarka la xoqo?						
Khamaar kusoo ciyaartay kaasino?						
Internetka ku khamaartay si aad lacag u hesho?						

**\* 12kii bilood ee ugu dambeeyey, intee jeer ayaad...**

	Marnaba	Mararka qaar	Marar badan	Mar kasta
Khamaarka/sharadka ka qarisay waalidkaa, xubnaha kale ee qoyska ama macallimiinta?				
Dareentay in ay dhici karto in aad qabto dhibaato dhanka khamaarka/sharadka ah?				
U goysay in aad asxaabta aan khamaarka/sharadka ciyaarin lasoo warwareegto si aad u raacdo saaxiibo iyagu khamaarka/sharadka ciyaara?				

**62. 12kii bilood ee ugu dambeeyey, intee jeer ayaad...**

	Marnaba	Mar ama laba jeer	3 ilaa 5 jeer	6 ilaa 9 jeer	10 jeer ama ka badan
Guriga ka carartay?					
Guri ama hanti jajabisay?					
Wax ku dhufatay ama garaacday qof kale?					
Wax ka soo qaadatay dukaan adiga oo aan lacag bixin?					

**63. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad...**

	0 maalin	1 ilaa 2 maalmood	3 ilaa 9 maalmood	10 ilaa 19 maalmood	20 ilaa 29 maalmood	Dhamaan 30ka maalmoodba
Cabtay sigaar?						
Cabtay cigars, cigarillos ama sigaarka gaagaaban?						
Isticmaashay tubaakada afka lageliyo, snuff ama dip?						
Isticmaashay Vape ama sigaarka elektarooniga ah sida JUUL, suarin, blu, VUSE, ama logic?						
Isticmaashay shiishad/hookah ama water pipe si aad u isticmaasho tubaako?						

**\* Markaad isticmaashay Vape ama aad isticmaashay sigaar elektaroonig ah 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey, sidee ayaad ku heshay?(calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Waxaan ka iibsaday baatrootol isteeshin ama dukaamada fudud
- b. Waxaan ka soo iibsaday dukaamada raashinka, dukaamada qiimaha jabiya (discount store) ama dukaamada daawada
- c. Waxaan ku iibsaday internetka
- d. Waxaan ka iibsaday dukaamada iibiya vape shop ama dukaamada kale ee iibiya sigaarka elektarooniga ah keliya
- e. Waxaan ka helay saaxiibo
- f. Waxaan ka helay waalidkay
- g. Waxaan ka helay xubnaha kale ee qoyska
- h. Waxaan ka helay qof aanan garanaynin
- i. Waxaan ka helay qof kale oo aniga ii soo iibiyey
- j. Waxaan ka soo qaatay gurigeyga
- k. Waxaan ka soo qaatay guriga saaxiibkay
- l. Waxaan ka soo qaatay dukaamada
- m. Waxaan ka helay hab kale

**64. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad cabtay sigaar ama waxyaabaha kale ee tubaakada ee dhadhankoodu yahay sida naac-naaca (mint) ama menthol?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 ilaa 2 maalmood
- c. 3 ilaa 9 maalmood
- d. 10 ilaa 19 maalmood
- e. 20 ilaa 29 maalmood
- f. 30 maalmood oo dhan

**65. Intii lagu jiray 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey, intee maalmood ayaad isticmaashay wax kasta oo tubaako ah oo dhadhan kale (flavor) ah, sida nacnac, miro, shukulaato, xawaaji, ama cabitaan khamri ah?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 ilaa 2 maalmood
- c. 3 ilaa 9 maalmood
- d. 10 ilaa 19 maalmood
- e. 20 ilaa 29 maalmood
- f. Dhamaan 30ka maalmoodba

**66. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad cabtay hal ama in ka badan oo cabitaan khamri ah?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 ilaa 2 maalmood
- c. 3 ilaa 5 maalmood
- d. 6 ilaa 9 maalmood
- e. 10 ilaa 19 maalmood
- f. 20 ilaa 29 maalmood
- g. Dhamaan 30ka maalmoodba

**\* Markaad isticmaashay khamriga 30-kii maalmood ee ugu dambeeyey, sideed u heshay? (calaamadee DHAMAAN kuwa ku khuseeya)**

- a. Waxaan khamriga ka iibsaday baatrootol isteeshin ama dukaamada fudud
- b. Waxaan khamriga ka iibsaday baararka ama makhaayadaha
- c. Waxaan khamriga ka iibsaday dukaamada
- d. Waxaan khamriga ka iibsaday internetka
- e. Waxaan khamriga ka helay asxaabta
- f. Waxaan khamriga ka helay waalidkay
- g. Waxaan khamriga ka helay xubnaha kale ee qoyska
- h. Waxaan khamriga ka helay qof kale oo aniga ii soo iibiyey
- i. Waxaan ka helay khamri xafladaha
- j. Waxaan khamriga ka soo qaatay gurigeyga
- k. Waxaan khamriga ka soo qaatay guriga saaxiibaday
- l. Waxaan khamriga ka soo qaatay dukaamada
- m. Waxaan khamriga ku helay hab kale

**67. Intii lagu jiray 12kii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayaa (haddii ay jirto) aad cabtay cabitaan khamro ah?**

- a. 0
- b. 1 ilaa 2
- c. 3 ilaa 5
- d. 6 ilaa 9
- e. 10 ilaa 19
- f. 20 ilaa 39
- g. 40 ama ka badan

**\* Haddii aad cabto khamriga beer/khamriga wine/khamriga wine coolers/khamriga liquor, guud ahaan in intee le'eg (haddii ay jirto) ayaad cabtaa hal mar?**

- a. Ma cabo khamriga biirta khamriga wine khamriga wine cooler khamriga liquor
- b. 1 dhalo/daasad/cabitaan
- c. 2 dhalo/daasad/cabitaan
- d. 3 dhalo/daasad/cabitaan
- e. 4 dhalo/daasad/cabitaan
- f. 5 dhalo/daasad/cabitaan ama wax ka badan

**\* (Gabhaha) 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad cabtay 4 cabitaan ama wax ka badan oo khamri ah oo isku xig-xiga, taas oo ah, dhowr saacadood gudahood?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 maalin
- c. 2 maalmood
- d. 3 ilaa 5 maalmood
- e. 6 ilaa 9 maalmood
- f. 10 ilaa 19 maalmood
- g. 20 maalmood ama ka badan

**\* (Wiilasha) 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad cabtay 5 cabitaan ama wax ka badan oo khamri ah oo isku xig-xiga, taas oo ah, dhowr saacadood gudahood?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 maalin
- c. 2 maalmood
- d. 3 ilaa 5 maalmood
- e. 6 ilaa 9 maalmood
- f. 10 ilaa 19 maalmood
- g. 20 maalmood ama ka badan

**68. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad daroogada mariwana ama hashish isticmaashay? (HA KU darin daroogada mariwanada daawada ee dhakhtar kuu qoray)**

- a. 0 maalmood
- b. 1 ilaa 2 maalmood
- c. 3 ilaa 5 maalmood
- d. 6 ilaa 9 maalmood
- e. 10 ilaa 19 maalmood
- f. 20 ilaa 29 maalmood
- g. Dhamaan 30ka maalmoodba

**69. Intii lagu jiray 12kii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayaad (haddii ay jirto) isticmaashay daroogada mariwana ama hashish? (HA KU darin daroogada mariwanada daawada ee dhakhtar kuu qoray)**

- a. 0
- b. 1 ilaa 2
- c. 3 ilaa 5
- d. 6 ilaa 9
- e. 10 illaa 19
- f. 20 ilaa 39
- g. 40 ama ka badan



**70. Intii lagu jiray 12-kii bilood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayaad (haddii ay jirto) aad...**

	0	1 ilaa 2	3 ilaa 5	6 ilaa 9	10 illaa 19	20 ama ka badan
Dhuuqday koollo/xabag ama ma neefsatay/jiiday qaaca ku jira daasada buufinta ama naqas kale si aad ugu mirqaanto?						
Isticmaashay LSD (acid), PCP (wet sticks ama dipped joints) ama maandooriye kale (mushrooms, angel dust)?						
Isticmaashay MDMA (E, X, Ecstasy, Molly), GHB (G, Liquid E, Liquid X, roofies) ama Ketamine (Special K)?						
Isticmaashay crack, coke ama cocaine ama nooc kale?						
Isticmaashay heroin (smack, junk, China White)?						
Isticmaashay methamphetamine (meth, glass, crank, crystal meth, ice)?						
Isticmaashay daawooyinka dukaanka laga iibsado sida sharoobada qufaca, daawooyinka qabowga ama kiniinka diet-ka oo aad u cuntay oo keliya inaad ku mirqaanto?						
Isticmaashay synthetic marijuana (K2, Gold) oo aad u isticmaashay oo keliya in aad ku mirqaanto?						
Isticmaashay daawooyinka kale oo artafiishal ah sida cusbada qubayska (Ivory Wave, White Lightning) oo aad u cuntay oo keliya inaad ku mirqaanto?						

**71. Intii lagu jiray 30kii maalmood ee la soo dhaafay, imisa maalmood ayaad isticmaashay daawooyinka dhakhtar qoray oo aan dhakhtar adiga kuu qorin ama ka duwan sida dhakhtarku kuu sheegay inaad u isticmaasho?**

- a. 0 maalmood
- b. 1 ilaa 2 maalmood
- c. 3 ilaa 5 maalmood
- d. 6 ilaa 9 maalmood
- e. 10 ilaa 19 maalmood
- f. 20 ilaa 29 maalmood
- g. 30 maalmood oo dhan

**72. Intii lagu jiray 12kii bilood ee ugu dambeeyey, imisa jeer ayaad isticmaashay mid ka mid ah daawooyinka dhakhtarku qoro ee soo socda iyada oo uuna dhakhtar kuu qorin ama ka duwan sida dhakhtarku kuu sheegay inaad u isticmaasho?**

	0	1 ilaa 2	3 ilaa 5	6 ilaa 9	10 illaa 19	20 ama ka badan
Daawada dareenada kicisa sida Amphetamines (bennies, speed, uppers) ama kiniinka la isku caateeyo?						
Daawooyinka ADHD ama ADD (Ritalin, Adderall, kaniiniyada kacsanaanta (hyper pills))?						
Daawooyinka xanuunka sida OxyContin, Percocet, Vicodin ama kuwa kale?						
Daawada wax lagu suuxiyo (Tranquilizers) sida Valium, Xanax, Klonopin, Ativan, daawooyinka murugada, sedatives ama benzos (downers)?						

**\* 12kii bilood ee ugu dambeeyey, miyaad...**

	Haa	Maya
Dareentay in aad u baahantahay in aad isticmaasho khamro ama daroogo ka badan intii hore si aad u dareento saamaynteeda?		
Isku dayday in aad yarayso isticmaalka khamriga ama daroogada laakiin ma awoodi wayday?		
Sii waddey isticmaalka khamrada ama daroogada xitaa haddii aad ogtahay inay dhib u gaysanayso xiriirkiina asxaabtaada ama qoyskaaga?		

**\* 12kii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayaad...**

	0 marna	1 mar	2 jeer	3 jeer ama ka badan
Maalinta dhan ama badankeeda ku bixisay in aad cabto khamro ama isticmaasho daroogo, ama aad iska saaraysay saameyntooda?				
Iska dhaaftay howlo aad la samayn lahayd bulshada ama madadaalo sida isboortiga ama in aad la joogto asxaabta ama qaraabada si aad u isticmaasho khamro ama daroogo ama in aad iska saarto saameyntooda?				
Seegtay shaqadaada ama iskuulka, ama ma dayacday mas'uuliyadaha kale ee waaweyn sababta oo ah khamriga ama daroogada?				
Qof wax ku dhufatay ama abuurta rabshad adiga oo isticmaalaya khamro ama daroogo?				
Isticmaashay khamri ama daroogo badan oo maalinta xigta aad garanweyday/xasuusan wayday wixii aad sheegtay ama aad sameysay?				
Isticmaashay khamri ama daroogo ka badan intii aad ku talagashay?				

**\* 12kii bilood ee la soo dhaafay, ma jiraa mar aad dareentay rabitaan aad u xoogan ama doonis inaad rabto khamro ama inaad isticmaasho daroogo oo aad iska caabin kari wayday ama aadan ka fakari karin wax kale?**

- Haa
- Maya

**\* 12kii bilood ee la soo dhaafay, imisa jeer ayay khamriga ama isticmaalka daroogadu kaa dhigeen in aad dareento iskubuuq, inaad kacsanaan dareento, shakisanaan inaad dareento ama aad awoodi wayday in aad danahaaga xooga saarto?**

- 0 jeer
- 1 mar
- 2 jeer
- 3 jeer ama ka badan

**73. Intee in le'eg ayaad u maleyneysaa inay dadku halis ugu jiraan inay naftooda dhaawac u geystaan jir ahaan ama siyaabo kale haddii ay...**

	Halis ma leh	Halis yar	Halis dhexdhexaad ah	Halis weyn
Haddii ay cabaan hal baako ama ka badan oo sigaar ah maalin kasta?				
Haddii ay cabaan shan cabitaan oo khamro ah hal mar ama laba jeer toddobaadkii?				
Haddii ay isticmaalaan daroogada mariwana hal mar ama laba jeer toddobaadkii?				
Haddii ay isticmaalaan daawooyinka dhakhtarku qoro oo aan iyaga loo qorin?				
Haddii ay cabaan Vape ama isticmaalaan sigaarka elektarooniga ah?				

**74. In ay khalad intee le'eg tahay ayay waalidkaagu dareemi lahaayeen haddii:**

	Inyarna khalad maaha	Xoogaa yar inay khalad tahay	Inay khalad tahay	Aad inay khalad u tahay
Aad cabto sigaar?				
Aad cabto hal cabitaan ama wax ka badan oo khamri ah maalin kasta?				
Haddii aad isticmaasho marijuana?				
Aad isticmaasho daawooyinka dhakhtarku qoro oo aan adiga lagu qorin?				
Aad cabto Vape (sigaarka dabka aan u baahneyn ee qaaciisa la dhuuqo) ama isticmaasho sigaarka elektarooniga ah?				

**75. In ay khalad intee le'eg tahay ayay saaxiibadaadu dareemi lahaayeen haddii:**

	Inyarna inayna khalad ahayn	Xoogaa yar inay khalad tahay	Inay khalad tahay	Aad inay khalad u tahay
Aad cabto sigaar?				
Haddii aad cabto hal cabitaan ama wax ka badan oo khamri ah maalin kasta?				
Haddii aad isticmaasho marijuana?				
Haddii aad isticmaasho daawooyinka dhakhtarku qoro oo aan adiga lagu qorin?				
Haddii aad cabto Vape ama isticmaasho sigaarka elektarooniga ah?				

**76. Sideed ayay kula yihiin mid kasta oo ka mid ah hadallada/weedhahan soo socda:**

	Si adag u raacsan	Raacsan	Mana raacsani mana diidani	Diiddan	Aad u diiddan
Waalidiinta iyo dadka waaweynba waa inay si cad ugala hadlaan caruurtooda waxyaabaha ku saabsan muhiimada ay leedahay in ayna isticmaalin khamrada.					
Cabbitaanka khamrigu marnaba uma fiicna qofkasta oo jira da'dayda.					

**77. Fikirkaaga, sidee ayaad u maleyneysaa in ARDAYDA iskuulkaaga BADANKOOD ay u arkaa hadallada/weedhaha soo socda:**

	Si adag u raacsan	Raacsan	Mana raacsani mana diidani	Diiddan	Aad u diiddan
Waalidiinta iyo dadka waaweynba waa inay si cad ugala hadlaan caruurtooda waxyaabaha ku saabsan muhiimada ay leedahay in ayna isticmaalin khamrada.					
Cabbitaanka khamrigu marnaba uma fiicna qofkasta oo jira da'dayda.					

**78. Imisa jeer ayaad isticmaashaa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda:**

	Marnaba	Isku dayay mar ama laba jeer	Mar ama laba jeer sanadkii	Bil kasta hal mar	Laba jeer bishiiba	Toddoba adkiiba mar	Maalin walba
Tubaakada (sigaarka, tubaakada la calaaliyo)?							
Khamriga (khamriga beer, khamriga wine, khamriga liquor)?							
Daroogada mariwaana (pot, hash, hash oil)?							
Qalabka Vaping (sigaarka qaaca ah) ama sigaarka elektarooniga ah?							

**79. Fikirkaaga, intee in le'eg ayaad u maleyneysaa in ARDAYDA iskuulkaaga BADANKOOD ay isticmaalaan mid kasta oo ka amid ah waxyaabaha soo socda:**

	Marnaba	Isku dayay mar ama laba mar	Mar ama laba mar sanadkii	Bil kasta hal mar	Laba jeer bishiiba	Toddoba adkiiba hal mar	Maalin walba
Tubaakada (sigaarka, tubaakada la calaaliyo)?							
Khamriga (khamriga beer, khamriga wine, khamriga liquor)?							
Darogada mariwaana (pot, hash, hash oil)?							
Qalabka Vaping (sigaarka qaaca ah) ama sigaarka elektarooniga ah?							

***\* waxay muujinaysaa su'aalaha laga boodi karo haddii aysan khusaynin ardayga marka la eego jawaabihii lasoo dhaafay.***